

Si habboon isaga tuur qashinka. Sidan u kala sooc qashinka.



Haraaga cuntada

Waxyaabaha soo hara marka aad cuntada karinayso ama kaddib. Ku rid kiish loogu talagalay qashinka cuntada oo ku tuur qolka kala saarista qashinka ee halka aad deggen tahay. Ama waxaad ku daraysaa qashinka caadiga ah.




Baakadaha caagga ah

Caagagga iyo bacaha oo dhan dib ayaa loo isticmaali karaa. Waxaad geyneysaa qolka kala saarista qashinka ee halka aad deggen tahay, ama goobta kala soocidda qashinka ee kuugu dhaw.



Gasacadaha birta ah

Gasacadaha, furarka iyo walxaha la midka ah waxaad geyneysaa qolka kala saarista qashinka ee halka aad deggen tahay ama goobta kala soocidda qashinka ee kuugu dhaw.



Baakadaha iyo wargeysyada

Baakad warqad ah iyo wargeysyada waxaad ku tuuraysaa qolka kala saarista qashinka ee halka aad deggen tahay ama goobta kala soocidda qashinka ee kuugu dhaw.




Dhalooyinka/quraaradaha

Dhalooyinka iyo gasacadaha quraaradda ka samaysan waxaad geyneysaa qolka kala saarista qashinka ee halka aad deggen tahay ama goobta kala soocidda qashinka ee kuugu dhaw.



Qashinka deegaanka halista ku ah

Wax kasta oo ah kiimikada wax cunta, dab dhalin kara oo deegaanka khatar ku ah waxaad geyneysaa xarunta weyn ee kala soocidda qashinka ee kuugu dhaw ama xarunta qashinka halista ku ah deegaanka (miljöstation). Daawada aadan u baahnayn waxaad geyneysaa farmashiga kuugu dhaw.




Qashinka waaweyn

Waxyaabaha u baahan boos weyn ama aad u culus waxaad geyneysaa xarunta weyn ee kala soocidda qashinka.



Qashinka elektagoonigga ah

Laambadaha iyo wax walba oo xarig fiilo ama batari leh waa qashin elektaroonig ah. kuwaas waxaad geyneysaa xarunta kuugu dhaw ee qashinka halista ku ah deegaanka (miljöstation) ama xarunta weyn ee kala soocidda qashinka.



Qashinka soo haray

Walxaha aan ka tirsanayn noocyada qashinka ee aan kor ku xusnay, waxaad ku tuuraysaa qolka kala saarista qashinka ee guriga ama waxaad ku daraysaa qashinka caadiga ah.

